JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.003**
**ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S.,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/802/B11/23**, ku taariikheysan **28/02/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka**.

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Ansixinta Hindise Sharciyeedka Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Muqdisho, 08 Maarso 2023**

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
12 MAR 2023
BY: Iban Xasan Cali
SAACAD ______ SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

Jumhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

**Tix:** XGGSH/ 802/B11/23:الرقم

**Mogadishu,** Febraayo 28, 2023 التاريخ

**Ku:** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka.**

M.ne Madaxweyne;

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee Hindise Sharciyeedka Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoorka Qaranka oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

Hindise Sharciyeedka Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd ***Janaayo 7, 2023*** wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG ansixiyey hindisahan ***Febraayo 6, 2023,*** isla markaana waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka ***Febraayo 26, 2023.***

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqsan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG kaaga codsanaynaa in aad Hindise Sharciyeedka Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.

Abdullahi

**M.ne Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow"**
**Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka**

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

Tell: +252 616641550/+252 618153111
E-mail. speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

# SHARCIGA HAY'ADDA NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS |
| --- |
| M.ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka BJFS |
| --- |
| Marwo Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS |
| --- |
| M.ne Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow" |

Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye ku
Xigeenka Koowaad

جـمـهـورية الصـــومـــال الفيــدرالية
مجلـــس الشـيوخ
مكتب نائب الرئيس الأول

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The First Deputy Speaker

Ref: XGK1/10/B11/2023 :الرقم

Taariikh: 26/02/2023 :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:-Guddiga Amniga iyo Difaaca Aqlka Saree e BFS =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Amniga Gudaha X.F.S. =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay Tix: **GAS/B-11/KF2/3 /2023** kuna taariikheysan **22 Feeberaayo 2023** kuna ansixiyay Goluhu **Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka:**

- Waxaa codeeyay: **35 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **31 Senatar.**
- Waxaa diiday: **3 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **1 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1aad Afna Kusimaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 26-2-2023
TIX: 52
SAXIIX:
GELID

# ANSIXINTA SHARCIGA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD SUGIDDA QARANKA

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 35 | 31 | 3 | 1 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cali Shacbaan Ibraihim | Taariikh: 22 Feb, 2023 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi | Taariikh: 22 Feb. 2023 |

| Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Cabdinaasir Ibraahim Guuleed | Taariikh: 22 Feb, 2023 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD SUGIDDA QARANKA

Muqdisho,
22 Feb. 2023

**Tix:** GAS/B-11/KF2/3/23
Kalfadhiga 2aad
Kulankiisa 15aad

**Taariikh:** 22 Feb. 2023

# GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## MARKUU AKHRIYAY:

Sharciga **Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **07 Feb. 2023** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

## MARKUU ARKAY:

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.49aad** iyo **Qod.50aad** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

## MARKUU ARKAY:

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

## MARKUU TIXGELIYAY:

Soo jeedinta in Sharciga **Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka** loo ansixiyo sida uu uga soo gudbay Golaha Shacabka ee B.F.S.

## MARKUU GAROWSADAY:

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga **Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka**.

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **2aad**, kulankiisa **15aad**, oo ay soo xaadireen **35 Senatar** (Soddon iyo shan Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

**Qod.1aad**

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay **Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka** isaga oo aan waxba ka beddelin.

**Qod.2aad**

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1aad Ahna Ku Simaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Golaha Aqalka Sare**
**Guddiga Difaaca iyo Amniga**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشيوخ**
**والامن الدفاع لجنة**

**The Federal Republic of Somalia**

**Upper House**

**Committee for Defense and Security**

---

**Ref; GDA/B-11/05/ 23** **Taariikh:** Feeberaayo 22, 2023

Ku: Guddoonka Golaha Aqalka Sare

Ku: Xubnaha Golaha Aqalka Sare

**Ujeeddo: Soo-jeedinta Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.**

Mudane Guddoomiye,
Senatorrada sharafta leh,

Hindise-sharciyeedka **Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka** oo uu Golaha Shacabku So ansixiyay **6dii Feeberaayo 2023** wuxuu Aqalka Sare soo gaaray **7dii** Feeberaayo 2023, iyada oo Wasaaradda Amniga Gudaha ee XFS ay akhrinta koowaad ka hor akhrisay Aqalka Sare **11kii** Feeberaayo 2023.

Guddoomiye Ku xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare ahna ku simaha Guddoomiyaha ayaa si rasmi ah Hindise-sharciyeedka ugu wareejiyay Guddiga Amniga iyo Difaaca Aqalka Sare ee B.F.S. 11 Feeberaayo 2023, sida uu qabo qodobka **45aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

Guddigu wuxuu Hindise-sharciyeedkan akhrintii 2aad ka hor akhriyay Aqalka Sare 18 Feeberaayo, 2023, iyada oo senatorrada sharafta leh ay soo jeediyeen talooyin wax ku ool ah.

Guddigu wuxuu dhegeystay talooyinkii iyo soo jeedinnadii wax ku oolka ahaa oo ay Sanatorradu u soo gudbiyeen Guddiga.

Soo-jeedinnada qaarkood waxay la xiriireen siiqeynta iyo eray-bixinta sharciga balse kuma jirin wax taabanay nuxurka sharciga.

Guddigu wuxuu ka baaraandegay soo-jeedinnada la xiriiray Federaaleynta sharcigan, isaga oo la akhriyay qodobka **54aad** ee Dastuurka KMG ah, waxayna ugu dambeyn Xubnaha Guddigu isku afgarteen in arrintan loo daayo qodobka **54aad**.

Sidoo kale, Guddigu wuxuu ka dooday Arrinta ah in Magaacibista Agaasimaha Guud uu Aqalka Sare ka qeyb qaato wuxuuna la akhriyay arrinta **qodobka 90aad faqraddisa (C)** ee Daastuurka KMG ah waxayna Xubnaha Guddigu isla qaateen in magacaabista loo daayo habraaca ku xusan qodobka **90aad (C)**.

**Senatorrada sharfta leh,**

Ugu dambeyn, si waafaqsan **Qod.49aad** ee Xeerhoosaadka Aqalka Sare,
waxaan si qaddarin leh iyo xushmad ku dheehan tahay idinka codsanaynaa in aad Hindise-sharciyeedka **Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka** ku aqbashaan kuna ansixisaan sida uu yahay.

**Mahadsanidiin.**

**Xubnaha Guddiga**

1. Sen.Aadan Cabdinaasir Maxamed
2. Sen.Maxamuud Maxamed Cabdinuur(Garabeey)
3. Sen.Maxamed Cabdi Cismaan (Majiino)
4. Sen.Ilyaas Beddel Gabboose
5. Sen.Ahmed Maxamed Cali (Afcadey)

Sen.Aadan Cabdinaasir Maxamed
Guddoomiyaha Guddiga

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: XGGSH/ 620 /B-11/23 :الرقم

Mogadishu, February 06, 2023: التاريخ

**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare.**
**Og:** **Madaxweynaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya.**
**Og:** **Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.**
**Og:** **Wasaaradda Amniga Qaranka.**
**Og:** **Garyqaanka Guud ee Dawladda.**
**Og:** **Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.**
**Og:** **Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.**

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD SUGIDDA QARANKA**

Mudane Guddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan_Ansixinta Hindise Sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka Iyo Nabad Sugidda Qaranka. Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 16aad taariikhdu markay ahayd **06/02/2023,** codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | **148** |
| **Oggol:** | **144** |
| **Diiday:** | **3** |
| **Ka aamustay:** | **1** |

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah.

Abdullahi Ab

**M.ne Cabdullaahi Cumar Abshirow**
**Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka**

## ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD SUGIDDA QARANKA

Tirada Xubnaha Codeysay: 148

Oggol: 144;

Diiday:3;

Ka Aamustay: 1;

**Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS**

| | |
|---|---|
| M.ne Cabdullaahi Cumar Abshirow | Tar: 06/02/2023 |

**Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS**

| | |
|---|---|
| M.ne Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulle (Jaabiri) | Tar: 06/02/2023 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:GWW01/ 0020 /01/2023

Taariikh: 05/01/2023

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo: <u>Soo Gudbin</u> Hindise-sharciyeedka Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka.

Mudane Guddoomiye,

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada summaddiisuna tahay **SHGW.00.16.01.23** ee **05/01/2023**, kuna saabsan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka"** oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye waxa aan halkan idin-kugu soo gudbineynaa **"Hindise-sharciyeedka Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka"** si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah; waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka"** maadaama baahi weyn loo qabo meel marintiisa.

Naga guddooma salaan diirran iyo qaddarin

Mudane Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALAKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 7-01-2023
TIX: 0028
SAXIIX:

Villa Somalia, +252-6-15233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or priminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:GWW01/ 084 /01/2023

Tariikh: 05/01/2023

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada JFS =Muqdisho=
Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo:- Go'aan Gole-Ansixin "Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka"

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qodobka 99aad xarfaha (a), (b), (c) iyo (f) ee Dastuurka KMG. |
| Markuu arkay: | Qodobka 100aad xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG. |
| Markuu arkay: | Warqadda summaddeedu tahay **WAG/XW/53/22 ee 12/12/2022,** ee codsiga soo jeedinta Wasiirka Amniga Gudaha. |
| Markuu arkay: | Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.16.01.23 ee **05/01/2023,** kuna saabsan ansixinta "**Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka**" oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey. |
| Markuu tixgeliyey: | Baahida loo qabo in la ansixiyo **Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka.** |

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.16.01.23** ee **05/01/2023,** kuna saabsan ansixinta "**Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka**" oo uu Goluhu ansixiyey.

Oodobka 2aad

In"**Hindise-sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugidda Qaranka**" si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA FEDERAL GOVERNMENT OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Mudane Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**WASAARADDA AMNIGAGUDAHA**
**XAFIISKA WASIIRU DOWLAHA**

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الأمن الداخلي
مكتب وزير الدولة

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Internal Security
Office of the State Minister

**Ref.WAG/XWD/ 53 /22**

**Tr: 14 December,2022**

**Ku : Ra'iisul Wasaaraha XFS**
**Og : Wasirka Wasaaradda Amniga Gudaha**

"Muqdisho"
"Muqdisho"

**Ujeeddo: Soo gudbin Sharciga Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugida Qaranka**

K/S Wasiirka Wasaardda Amniga Gudaha :-

**Markuu Arkay :** Qodobka 80-aad faqradiisa 1-aad (A) ee Dastuurka sida KMG ah loo ansixiyay

**Markuu Arkay :** Qodobka 99-aad faqradihiisa A,B,C,E iyo F ee Dastuurka sida KMG loo ansixiyay.

**Markuu Arkay :** Qodobka 102-aad faqradiisa (I) ee Dastuurka sida KMG loo ansixiyay.

**Markuu Tixgeliyay :** Baahida loo qabo Sharciga Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugida Qaranka.

Sidaas darted, Mudane Ra'iisul Wasaare waxaan si xushmad iyo qaddarin leh aan halkaan kugu soo lifaaqay Sharciga Hay'adda Sirdoonka & Nabadsugida Qaranka si ay u meel mariyaan shaciggaan Golaha Wasiradda iyo Baarlamaanka.

**Iga Guddoon Salaan Diiran iyo Qadarin gaar ah.**

**Mud. Maxamed [illegible]**
**Kusimaha Wasiirka [illegible]**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.**

**MINISTRY'S ADDRESS:** MAKA-AL-MUKARAMA MAIN ROAD, SHANGANI DISTRICT, MOGADISHU, SOMALIA
Tell: +252-619057777 E-mail. stateminister@mois.gov.so

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# GOLAHA SHACABKA

## HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA NABADSUGIDDA IYO SIRDOONKA QARANKA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
07 FEB 2023
SOO GELID/RECEIVED

Tusmo:


cutubka 1aad: Hordhac ....... 4

Qodobka 1aad: Erey Bixin ....... 4

Qodobka 2aad: Awoodda Soo Saaridda Sharcigan ....... 5

Qodobka 3aad: Mabaadii'da Hageysa ....... 5

Cutubka 2aad: Qaab-Dhismeedka, Astaanta Iyo Calanka Hay'adda ....... 5

Qodobka 4aad: Dib U Dhiska Hay'adda ....... 5

Qodobka 5aad: Astaanta & Calanka Hay'adda ....... 6

Qodobka 6aad: Qaab-Dhismeedka Hay'adda ....... 6

Cutubka 3aad: Shaqada & Waajibaadka Hay'adda ....... 6

Qodobka 7aad: Shaqada Hay'adda ....... 6

Qodobka 8aad: Awoodaha Hay'adda ....... 7

Cutubka 4aad: Qorista, Magacaabidda Iyo Arrimaha Xubnaha ....... 8

Qodobka 9aad: Magacaabidda Agaasimaha Guud ....... 8

Qodobka 10aad: Shuruudaha Agaasimaha Guud ....... 8

Qodobka 11aad: Waajibaadka Agaasimaha Guud ....... 8

Qodobka 12aad: Awoodaha Agaasimaha Guud ....... 9

Qodobka 13aad: Arrimaha Ka Reebban Agaasimaha Guud ....... 9

Qodobka 14aad: Xil-Waayista Agaasimaha Guud ....... 9

Qodobka 15aad: Magacaabista Kaaliyayaasha Agaasimaha Guud ....... 10

Qodobka 16aad: Shuruudaha Kaaliyayaasha Agaasimaha Guud ....... 10

Qodobka 17aad: Shuruudaha Xubinnimada Hay'adda ....... 10

Qodobka 18aad: Qaadashada Xubin Cusub ....... 10

Qodobka 19aad: Muddada Tijaabada Iyo Shaqojoogteynta ....... 11

Qodobka 20aad: Dhaarta ....... 11

Qodobka 21aad: Anshaxa Iyo Mabaad Xubnaha Hay'adda ....... 11

Qodobka 22aad: Ku Meelaynta Hay'adda Qof Aan Ka Tirsanayn ....... 11

Qodobka 23aad: Mushaarka, Gunnooyinka, Dalacsiinta & Xaqsiinta ....... 12

Qodobka 24aad: Awoodaha Xubnaha ....... 12

Qodobka 25aad: Xuquuqda Asaasiga Ah Ee Xubnaha ....... 12

Qodobka 26aad: Mudnaan Gaar Ah ....... 12

Qodobka 27aad: Ciidanka Labbisan Ee Hay'adda ....... 13

Qodobka 28aad: Shaqa Ka Joojin, Keyd Galin, Darajo Dhimis Iyo Shaqo Ka Saarid ....... 13

Qodobka 29aad: Waayidda Xubinnimada ....... 14




JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

Qodobka 30aad: Xaqa Dacwadda Iyo Eed-Sheegashada Xubnaha ..... 14
Qodobka 31aad: Arrimaha Ka Reebban Xubnaha Hay'adda ..... 14
Qodobka 32aad: Maxkamadaynta Xubnaha Hay'adda ..... 14
Qodobka 33aad:Anshax-Marinta Xubnaha ..... 15
Cutubka 5aad: Codsiga Bixinta Waaran ..... 15
Qodobka 34aad: Codsiga Hay'adda Ee Helidda Waaran ..... 15
Qodobka 35aad: Bixinta Waaran ..... 15
Qodobka 36aad: Xaalad Deg Deg Ah ..... 15
Qodobka 37aad: Xuquuqda Dadka Hay'addu Hayso ..... 16
Qodobka 38aad: Baarista Iyo Hubinta ..... 16
Qodobka 39aad: Jirdil Iyo Xadgudub ..... 16
Qodobka 40aad: Sheegashada Xubinnimada Hay'adda Iyo Matalaad Been Abuur Ah ..... 17
Qodobka 41aad: Is Hortaagga Shaqada Hay'adda ..... 17
Qodobka 42aad: Shaacinta Xog Aan La Fasaxin ..... 17
Qodobka 43aad: Baabi'inta Xiriirro Iyo Xogo Sirdoon ..... 17
Cutubka 6aad: Maaliyadda Hay'adda ..... 17
Qodobka 44aad: Miisaaniyadda Hay'adda ..... 17
Qodobka 45aad: Xisaabaadka Iyo Hantidhowrka ..... 18
Qodobka 46aad: Dhaqaalaha Hay'adda ..... 18
Cutubka 7aad: Qodobbo Qubane Ah ..... 18
Qodobka 47aad: Kaalinta Wasaaradda Amniga Gudaha Ee Ku Aadan Hay`Adda ..... 18
Qodobka 48aad: Waajibnimada La Shaqaynta Hay'adda ..... 18
Qodobka 49aad: Mamnuucidda Xabsiyo Qarsoodi Ah ..... 18
Qodobka 50aad: Baabi'in ..... 18
Qodobka 51aad: Dhaqan-Galka Sharcigaan ..... 19

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA · GOLAHA SHACABKA · REPUBLIC · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

## CUTUBKA 1AAD: HORDHAC
## QODOBKA 1AAD: EREY BIXIN

Ereyada soo socda, haddii aan Sharcigan gudihiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa erey kasta fasiraadda ku hor qoran:

1) AgaasimahaGuud/**Taliyaha:** Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka (HNSQ).
2) **Dabagal:** la socosho gaar ah oo ay Hay'addu saarto cid ama ***goob*** ay tuhunsan tahay ama ay dareen ka qabto.
3) **Dastuurka**: Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
4) **Golaha Wasiirrada:** Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka ee Soomaaliya.
5) **Hubin Amni:** Waxaa loola jeedaa Xaqiijin ay Hay'addu ku sameyso qof ama goob si waafaqsan sharciga
6) **Jamhuuriyadda**: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
7) **Jirdil:** Waxaa loola jeedaa Fal kasta oo sababi kara xanuun daran, dhaawac jireed ama dhib maskaxda, garashada iyo dareensidayaasha la gaarsiiyo, oo si ula kac ah loogu gaystay qof iyada oo laga leeyahay ujeeddo:
   (b) In laga helo xog ama qiraal qasab ah;
   (t) Ku ciqaabidda qofka ficil isagu uu gaystay ama qof kale oo lala xiriirinayo uu gaystay ama looga shakiyey in uu gaystay;
   (j) Handadaad ama qasbid loo geysanayo qofka ama qof lala xiriirinayo;
   (x) Sabab ku salaysan faquuq nuuca uu rabo ha ahaado.
8) **Joojin**: Hakin waqti kooban oo aan 48 saac ka badneyn ay Hay'addu ku sameyso dhaq-dhaqaaqa qof uu tuhun maangal ah soo galay;
9) **Madaxweynaha**: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.
10) **Qabasho:** Gacan ku dhigis qof ama wax ay Hay'addu ku raad joogtay, tuhuntay ama ay fal-dambiyeed ku heshay;
11) **Xeer-nidaamiye:** Xeer-nidaaminayaha howlaha Hay'adda ama barnaamij ku mataaneysan oo uu soo saarayo Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 99aad, Faqradda (b) ee Dastuurka iyo Sharcigaan;
12) **Xeer-Hoosaad:** Xeer maamul oo hagaya howlaha Hay'adda oo uusoo saaro Agaasimaha Guud/ Taliyaha si waafaqsan Sharcigaan
13) **Xubin**: Qof kasta oo ka tirsan Hay'adda oo lagu shaqaaleeyey/Ciidameyay si waafaqsan Sharcigan iyo Xeernidaamiyaha/Xeer-hoosaadka Hay'adda;
14) **Xuuraan:** Xog ururin dahsoon oo ay Hay'addu ku sameyso cid ay tuhuntay, xaalad jirta, ama qof ay masuul ka tahay amnigiisa gaarka ah si ay xaaladdiisa ula socoto;
15) **Xog Qarsoodi ah**: Waxaa loola jeedaa Xog xasaasi ah taas oo bixinteedu khatar ku tahay amniga iyo danaha qaranka Soomaaliyeed.
16) **Hay'adda:** Hay'adda/Taliska Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka Ee Sharcigaan dhisayo.
17) **Danaha Qaranka:** Waxaa loola jeedaa Bedqabka Qaranka Soomaaliyeed, Sarreynta Dastuurka Dalka, Ilaalinta Madaxbanaanidda Siyaasadeed, Dhaqaale, Bulsho, xuduudaha iyo Khayraadka dabiiciga ah.
18) **Kaaliye:** waxaa loola jeeda mid ka mid kaaliyayaasha Agaaasimaha guud/Taliyaha HNSQ ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 16aad ee Sharcigaan.
19) **La-taliye:** Waxaa loola jeedaa shaqsi leh aqoon sare iyo khibrad ballaaran howsha loo igmadayna takhasuskeeda leh.

## QODOBKA 2AAD: AWOODDA SOO SAARIDDA SHARCIGAN

1) Si waafaqsan Qodobka 126, Faqradda 1aad (b) iyo Faqradda (2) ee Dastuurka, Barlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa uu soo saaray Sharciga Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka oo dib loogu dhisayo Hay'addii Nabadsugidda Qaranka;
2) Sharcigan waxaa uu ka dhaqangalayaa guud ahaan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sharcigaan waxa uu nidaaminayaa dhismaha, shaqada, awoodaha iyo arrimaha kale ee la xiriira Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka.

## QODOBKA 3AAD: MABAADII'DA HAGEYSA

1) Hay'addu, iyada oo gudanaysa waajibaadkeeda, ilaalinaysa xorriyadaha iyo xuquuqda asaasiga ah ee uu bixinayo Cutubka 2aad ee Dastuurka; u hoggaansamaysa mabaadii'da ciidammada amaanka ee ku xusan Qodobka 127aad ee Dastuurka, waxa ay shaqadeeda inta ay ku jirto:
    (b) U howlgeli doontaa in xubnaheedu ku shaqeeyaan heerka ugu sarreeya ee hufnaan iyo anshax wanaag;
    (t) Ka fogaaneysaa musuqmaasuqa, eexda iyo heyb-sooca, waxa ayna ku dhaqmaysaa hufnaan iyo isla xisaabtan dhexdeeda ah;
    (j) Ilaalinaysaa xorriyadaha iyo xuquuqaha asaasiga ah ee Dastuuriga ah, xuquuqaha ay bixinayaan heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya qayb ka tahay iyo shuruucda dhaqangalka ah;
2) Hay'addu waxa ay awoodaheeda iyo shaqooyinkeeda u gudanaysaa si ay ku jirto danta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3) Hay'adda, xubnaheeda, iyo cid kasta oo la shaqeysa marna kama shaqaynayaan hawlo ka soo horjeeda Dastuurka, Nuxurka Dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka, mana qaadanayaan Amarro aan waafaqsanayn Dastuurka iyo Shuruucda kale ee dalka.

## CUTUBKA 2AAD: QAAB-DHISMEEDKA, ASTAANTA IYO CALANKA HAY'ADDA

## QODOBKA 4AAD: DIB U DHISKA HAY'ADDA

1) Sharcigaan waxa uu dhisayaa **"Hay'adda Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka** afka carabigana waxa uu ku noqonayaa "جهاز المخابرات والامن القومي" halka afka Ingiriiskana uu ku noqonayo **"National Intelligenc and Security Agency"** loona soo gaabin doono **"NISA"**, Sharcigaan dhexdiisana waxaa loogu yeeri doonaa **"Hay'adda"**;
2) Hay'addu dabeecad ahaan waa hay'ad amni oo heer Federaal ah, waxa ayna hoggaanno si toos ah u hoos yimaada ku yeelaneysaa dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka;
3) Dhammaan howlaha iyo waajibaadka Hay'adda waxaa si toos ah uga masuul ah uguna madax-bannaan Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Hay'adda;
4) Hay'adda waxaa ku soo wareegaya masuuliyadda dhammaan shaqaalihii Hay'addii Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka ee Sharcigaan hortiis shaqaynayey, sidaas oo kale Hay'adda waxaa ku soo wareegaya dhammaan hantida guurtada iyo ma guurtada ah oo Hay'adda faqraddaan ku xusan horay u lahaayeen;
5) Hay'addu waxa ay yeelanaysaa shakhsiyad qaanuuni ah, waxayna u gudanaysaa shaqadeeda iyo waajibaadkeeda si waafaqsan Sharcigaan.

## QODOBKA 5AAD: ASTAANTA & CALANKA HAY'ADDA

1) Hay'addu waxa ay leedahay astaan iyo shabbad u gaar ah. Sida ku cad lifaaqa kowaad ee Sharcigaan la socda, astaanta Hay'adda waxa ay ka kooban tahay:
(b) Shimbir (Hud-hud) ah oo taagan, labada garab iyo dibkuna u fidsanyihiin; Labada garab ee Hud-hudka waxa ay leeyihiin min sagaal baal, oo foodda ka wada madow;
(t) Gaashaan midabkiisu yahay buluug furan, ayaa saaran laabta Shimbirka Hud-hudka ah iyo labo waran oo isweydaarsan oo caaradoodu kor u jeedo oo saaran dhabarka Hud-hudka.
(j) Xiddig cad oo shan gees leh ayaa ku taalla bartamaha gaashanka;
(x) Magaca Hay'adda iyo tarjumaadiisa oo English ku qoran (National Intelligence and Security Agency) iyo soo gaabintiisa (NISA) oo laba xiddig oo buluug ah labada dhinac ka xigaan, qaab wareeg ahna ugu dhex qoran diillin midabkeedu yahay casaan furan;
(kh) Labo suun oo midabkoodu yahay kafee laguna dhex qoray kan kore magaca dalka oo Soomaali ah (SOOMAALIYA), Kan hoosana ayaad Qur'aanka ah (رَبِّ اجْعَلْ هَذَا بَلَدًا آمِنًا)
2) Hay'addu waxa ay leedahay calan leydi cad ah oo dhexda ku leh astaanta Hay'adda.

## QODOBKA 6AAD: QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA

1) Qaab-dhismeedka Hay'addu waxa uu ka kooban yahay Agaasimaha Guud/Taliyaha, Kaaliyayaal, Agaasinno/Taliye Qayb, Hoggaanno/Waaxyo, Laamo iyo Xafiisyo sida ku cad jaantuska ka muuqdo lifaaqa labaad ee la socda Sharcigaan;
2) Hay'adda waxa ay ku yeelaneysaa dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka xaafiisyo iyo talisyo heerkoodu yahay hoggaanno, xeryo, iyo xarummo baaris; waxa ayna ka howlgaleysaa dhammaan gobollada dalka, dagmooyin iyo heer walba oo maamul deegaan ah.
3) Guud ahaan habraaca wadashqeynta kaaliyayaasha, agaasinnada, hoggaannada, waaxyaha, laamaha iyo xafiisyada kala duwan ee Hay'adda, xilka iyo waajibaadkooda waxaa nidaaminaya xeer-hoosaadyo uu soo saaro Agaasimaha Guud/Taliyaha.

## CUTUBKA 3AAD: SHAQADA & WAAJIBAADKA HAY'ADDA

## QODOBKA 7AAD: SHAQADA HAY'ADDA

Hay'addu waxa ay ka shaqeyneysaa ilaalinta danaha qaranka ee dalka guduhiisa iyo dibaddiisa, iyada oo u howlgaleysa:

1) Ilaalinta sirta qaranka Soomaaliyeed;
2) Ururinta, gorfeynta, iyo keydinta xogaha ahmiyadda gaarka ah u leh amniga iyo horumarka qaranka Soomaaliyeed nooc kasta oo ay ahaato;
3) Diyaarinta warbixinno iyo daraasaad joogta ah oo ka turjumaya xaaladaha amni ee dalka ka jira ee dhabta ah, lana wadaagto madaxda qaranka iyo dhinacyada kale oo ay tahay in ay gaarto xogta la helay;
4) Dabaggalka iyo baarista dhammaan dhaq-dhaqaaqyada, dhacdooyinka, iyo xaaladaha taabanaya amniga qaranka Soomaaliyeed, dalka gudihiisa iyo dibadda intaba;
5) Ilaalinta amniga gaarka ah ee masuuliyiinta sar-sare, iyo goobaha sida gaarka ah muhimadda ugu leh qaranka Soomaaliyeed, cadawguna uu tilmaansanayo, iyo ka qeybqaadashada sugidda amniga dalka si waafaqsan dabeecadda Sirdoon ee Hay'adda;
6) Kashifidda iyo ka hortagga dibindaabyada iyo burburinta lagu waxyeeleynayo amniga, sumcadda, madaxbannaanida, danaha iyo karaamada umadda Soomaliyeed oo ay ka wadaan ururrada argagixisada ah, dowladaha shisheeye, danbiilayaasha abuubulan iyo cid kasta oo cadaw u ah Dalka Soomaaliya, gudaha iyo dibadda;

7) Iskaashiga caalamiga ah iyo kan goboleed ee la xiriira isla shaqeynta hay'adaha dhiggeeda ah qaab u adeegaya danaha Qaranka Soomaaliyeed iyo xasilloonida gobolka iyo caalamka;
8) Siinta xogaha iyo talooyinka khuseeya arrimaha amniga oo ay u baahan yihiin laamaha Dowladda Soomaaliya iyo kuwa gaarka loo leeyahay;
9) Kala shaqeynta hay'adaha amniga ee kale si ay u ogaadaan ugana hortagaan dambiyada waaweyn iyo khataraha ku wajahan amniga qaranka, si waafaqsan dabeecadda Sirdoon ee Hay'adda;
10) U fidinta laamaha Dowladda wixii adeeg xuuraan ah, ama xiriir la leh shaqada Hay'adda oo ay u baahdaan;
11) La dagaallanka argagixisada iyo guud ahaan ururrada iyo kooxaha mugdiga ku shaqeysta, lid-na ku ah amniga qaranka si waafaqsan dabeecadda iyo shaqada Hay'adda.

## QODOBKA 8AAD: AWOODAHA HAY'ADDA

1) Hay'addu waxa ay yeelanaysaa dhammaan awoodaha aan looga maarmin ama faa'idada u leh shaqadeeda si waafaqsan Dastuurka, Sharcigaan iyo qawaaniinta dalka;
2) In ay ka hesho cid kasta xogta ay uga baahato nuuca ay ahaataba, isla markaana ay daalacato, keydsato ama ay ka gudato waajibkeeda marka ay hesho oggolaansho maxkamadeed.
3) Inay xuuraan, dabaggal iyo fatashaad ku sameyso ciddii ay u aragto in ay ku howlan tahay wax liddi ku ah amniga iyo xasilloonida Dalka;
4) Markii ay hesho Waaran maxkamdeed, inay dhageysato, hubiso, ama ay dabaggal ku sameyso xiriirrada isgaarsiinta, internetka iyo boostada cid walba oo uu soo galo tuhun khatar ku ah amniga iyo danaha qaranka;
5) In ay u yeerto, wareysato, ama wardhalis aan jirdil iyo midiidin laheyn la yeelato qof kasta oo tuhun soo galo, iyo in ay keydsato xogta ay ka hesho si waafaqsan Sharcigaan;
6) In ay qabato, joojiso, ama xakameyso dhaq-dhaqaaqa ciddii ay u aragto in ay khatar ku tahay amniga iyo xasilloonida; si loo sameeyo baaris dhammeystiran, hase yeeshee waa in lagu helo qofka la qabanayo ama la joojinayo ama la xakameynayo dhaqdhaqaaqiisa caddeymo ama xogo hordhac ah oo keeni kara tuhun weyn, islamarkaana waa in ogolaansho baaris iyo sii hayn looga helaa garsoorka ku shaqada leh haddii qofka la haynayo muddo ka badan 48 saac;
7) In ay fatashaad ku sameyso guriga, gaariga, ganacsiga, goobta gaarka ah, qalabka isgaarsiinta, kumbuyuutarrada iyo guud ahaan wax walba oo khuseeyo tuhmanaha ay Hay'addu si waafaqsan faqradaha ku xusan Cutubka 2aad ee Dastuurka
8) In ay qabato, joojiso ama ay hakiso hantida loo arko in dhaq- dhaqaaqeedu uu khatar ku yahay amniga iyo xasilloonida Dalka marka la helo caddeymo hordhac ah oo keeni kara tuhun weyn si waafaqsan Sharcigaan; waa in loo helaa go'aan garsoor oo sababaysan haddii muddo ka badan 72 saacadood ay Hay'addu hakineyso dhaq- dhaqaaqa hantidaas;
9) Hubinta iyo la socoshada shaqaalaha rayidka ah iyo ciidanka ay qoranayaan ama ku soo biiraya hay'adaha kala duwan ee dowladda, iyo guud ahaan masuuliyiinta xilalka kala duwan ee dowladda loo magacaabayo markii loo baahdo in lagu sameeyo hubin amni;
10) Hubinta amniga iyo howlaha shirkadaha ganacsiga ee fidiya adeegyada asaasiga u ah nolasha bulshada sida: biyaha, korontada, cuntada, dawada, shidaalka, isgaarsiinta, rugaha caafimaadka, waxbarashada, hoteelada iyo goobaha lagu nasto.
11) La socoshada iyo hubinta shaqada iyo shaqaalaha hay'adaha iyo shirkadaha ajnabiga ah ee ka shaqeeya samafalka, ganacsiga iyo horumarinta;
12) Hubinta amni ee lagu sameeyo ajaanibta qaadanaya deganaashaha, iyo jinsiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

13) Isticmaalka hub iyo cudud ciidan, iyo sameynta howlgallo amni oo hubeysan marka loo baahdo si waafaqsan qodobka 28-aad, faqradiisa 3-aad.

## CUTUBKA 4AAD: QORISTA, MAGACAABIDDA IYO ARRIMAHA XUBNAHA

### QODOBKA 9AAD: MAGACAABIDDA AGAASIMAHA GUUD

1) Hay'adda waxaa hoggaaminaya Agaasime Guud/Taliyaha, Golaha Wasiirrada ayaana soo jeedinaya magacaabistiisa, ka dibna waxaa lagu magacaabayaa xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu soo saarayo si waafaqsan Qodobka 117aad, Qodobka 90aad, Faqradda (k) ee Dastuurka;
2) Agaasimaha Guud/ Taliyaha waxaa loo magacaabi karaa qof ciidan ah ama rayid ah marka uu soo buuxiyo shuruudaha ku xusan Sharcigaan;
3) Xil ka qaadista Agaasimaha Guud/ Taliyaha, waxaa soo jeedinaya Golaha wasiirada ee Xukuumadda JFS, si waafaqsan Dastuurka, Qodobkiisa 90aad, faqardiisa (c), waxaana xilka ka qaadaya Madaxweynaha JFS.

### QODOBKA 10AAD: SHURUUDAHA AGAASIMAHA GUUD

Qofka loo magacaabayo xilka Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Hay'adda waa in uu soo buuxiyaa shuruudaha soo socda:

4) Waa in uu soo buuxiyo shuruudaha xubinnimada Hay'adda ee ku xusan Qodobka 17aad ee Sharcigan;
5) Waa in aan da'diisu ka yareyn 35 sano kana weyneyan sanadka howlgabka si waa faqasan xeer ka hawl gabka;
6) Waa in uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed oo uu ka qaatay jaamacad laga aqoonsan yahay dalka ay ku taal ama ka diiwaan gashantahay ama Aqoon Ciidan oo u dhiganta
7) Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo aan ka yareyn toban (10) sano xiriirna la leh shaqada Hay'adda ama xil sare ka soo qabtay hay'adaha kale ee dowladda;
8) Waa in uu xog-ogaal u yahay xaaladda guud ee dalka.
9) Waa in uusan ku dhicin xukun maxkamadeed oo ka reebaya in uu qabto xil dowladeed;
10) Waa in uusan laheyn xiriir taban oo kala dhaxeeya dalal iyo sirdoonno ajanabi ah oo loo hayo caddeymo ama leh sooyaal muuqda.

### QODOBKA 11AAD: WAAJIBAADKA AGAASIMAHA GUUD

Si waafaqsan Sharcigaan, Agaasimaha Guud/Taliyaha waxaa ku waajib ah in uu si hufan u guto waajibaadka soo socda:

1) Waxa uu masuul ka yahay maamulka, maaraynta iyo hawlgallada guud ee Hay'adda;
2) In uu qaado dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah si loo hubiyo in falalka Hay'addu ku koobañ yihiin shaqada Hay'addu u xilsaaran tahay oo kaliya si waafaqsan Dastuurka, Sharcigaan iyo qawaaniinta kale ee dalka;
3) Jaangoynta qorshaha guud ee Hay'adda si waafaqsan siyaasadda guud ee amniga qaranka; waana in uu qorshuhu ahaado sanadle leh halbeegyo si fudud looga dheehan karo waxqabadka Hay'adda dhammaadka sanad walba;
4) Diyaarinta iyo soo gudbinta miisaaniyadda guud ee Hay'adda;
5) Soo saarista amarrada guud, kuwa gaarka ah iyo go'aannada maamul ee lagu socodsiinayo shaqada Hay'adda si waafaqsan Sharcigaan iyo Dastuurka dalka;
6) La talinta Madaxweynaha, Guddoonka Baarlamaanka, Golaha Wasiirrada iyo masuuliyiinta kale arrimaha ku saabsan amniga;

7) Wixii waajibaad kale ah ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda ama Golaha Wasiirrada u xil saaraan si waafaqsan Sharcigaan iyo Dastuurka.

## QODOBKA 12AAD: AWOODAHA AGAASIMAHA GUUD

Agaasimaha Guud/Taliyaha waxa uu leeyahay awoodaha soo socda:

1) Waxaa uu magacaabaa guud ahaan xilalka Hay'adda si waafaqsan Sharcigaan, Dastuurka iyo shuruucda dalka;
2) Waxa uu si buuxda u matalaa Hay'adda;
3) Waxa uu xil ka qaadis iyo shaqo ka joojin ku sameeyaa masuuliyiinta xilalka ka haya Hay'adda isaga oo raacaya Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha iyo xeer-hoosaadka Hay'adda;
4) Waxa uu keyd galiyaa xubnaha muteystay ama laga maarmi waayey in keyd la galiyo si waafaqsan xeer-nidaamiyaha;
5) Waxa uu shirguddoomiyaa shirarka joogtada ah iyo kuwa aan joogtada aheyn ee Hay'adda;
6) Waxa uu leeyahay awoodda soo saaridda iyo maareynta maaliyadda si waafaqsan Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha iyo xeer-hoosaadka ee Hay'adda;
7) Waxa uu soo saaraa amarrada la xiriira howlgallada gaarka ah oo ay fulinayaan ciidammada Hay'adda iyo gaashaanbuurta caawiya ama iskaashigu kala dhaxeeyo;
8) Waxa uu leeyahay isticmaalka awood kasta oo uu siiyo Sharcigaan iyo gudashada waajib kasta oo ka saaran ilaalinta Sharcigaan, xeer-nidaamiyayaasha iyo xeer-hoosaadyada Hay'adda;
9) Waxaa u furan in uu qeyb ahaan awoodihiisa, si joogta ah ama ku meelgaar ah, ugu xilsaarto kaaliyeyaashiisa iyo xubnaha kale ee Hay'adda, waana in uu qoraal rasmi ah ku caddeeyo awoodda xubinta loo xilsaaray iyo muddada ay soconayso oo faafinta Hay'adda la galiyo.

## QODOBKA 13AAD: ARRIMAHA KA REEBBAN AGAASIMAHA GUUD

Agaasimaha Guud/Taliyaha waxaa ka reebban inta uu xilka hayo:

1) In uu qabto xil dowladeed kale ama uu sii hayo xil kale oo uu horay u hayey;
2) In uu magaca Jamhuuriyadda ku galo heshiisyo qarsoodi ah oo uusan ogalaasho u haysan;
3) Bixinta ama ku dheefsiga gaarka ah ee hantida Guurtada iyo maguurtada ah ee Hay'adda.
4) Xil ka qaadista, shaqo ka joojinta, xaq-duudsiinta iyo xarigga xubnaha ee aan waafaqsaneyn Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha iyo xeer-hoosaadyada Hay'adda;
5) In uu iibsado ama ijaarto hantida Hay'adda ama mid dowladeed guud ahaan si shakhsi ah;
6) In uusan magaca Hay'adda ku geli karin heshiis ganacsi oo aan marin habraacyadii loo baahnaa.

## QODOBKA 14AAD: XIL-WAAYISTA AGAASIMAHA GUUD

1) Agaasimaha Guud/Taliyaha waxa uu xilka ku weyn karaa oo keli ah:

   (b) In uu geeriyoodo ama uu sabab caafimaad darteed u gudan waayo waajibaadkiisa muddo 90 cisho ka badan;

   (t) In xilka laga qaado, si waafaqsan Qodobka 9-aad, Faqradiisa 3-aad;

   (j) In uu galo ama ku dhaco arrin ka mid ah arrimaha ka reebban Agaasimaha Guud/Taliyaha ee ku cad qodobka 13aad ee Shacigaan;

   (x) In uu ku dhaco xukun Ciqaabeed oo kama dambays ah;
2) Haddii xilka iyo xafiiska Agaasimaha Guud bannaanaado sabab ay ahaataba, waxaa ku-sime noqonaya hadba kaaliyaha uu sheego xeer- nidaamiyaha Hay'adda.

## QODOBKA 15AAD: MAGACAABISTA KAALIYAYAASHA AGAASIMAHA GUUD

1) Agaasimaha Guud ee Hay'addu waxa uu yeelanaayaa kaaliyeyaal, kaaliye kastana waxaa hoos tagaya agaasinno, hoggaanno, waaxyo, laamo iyo xafiisyo ku shaqo leh shaqada loo magacaabay kaaliyaha;
2) Agaasimaha Guud ayaa awood u leh inuu magacaabo kaaliyayaasha isaga oo raacaya shuruudaha ku xusan Qodobka 16aad ee Sharcigaan;
3) Agaasimaha Guud ayaa awood u leh in uu shaqada ka joojiyo ama xilka ka qaado kaaliyayaasha si waafaqsan Sharcigaan iyo xeer- hoosaadka Hay'adda;
4) Marka la magacaabayo kaaliyayaasha, agaasimayaasha, iyo guud ahaan xilalka Hay'adda ama xubno cusub oo Hay'addu qaadaneyso, waa in ay u dhacdaa si waafaqsan Sharcigaan iyo Qodobka 11aad ee Dastuurka.

## QODOBKA 16AAD: SHURUUDAHA KAALIYAYAASHA AGAASIMAHA GUUD

Qofka loo magacaabayo xilka Kaaliyaha Agaasimaha Guud waa in uu soo buuxiyaa shuruudahan soo socda:

1) Waa in uu yahay xubin ka tirsan Hay'adda;
2) Waa in ayna da'diisu ka yareyn 35 sano Kana waynayn da'da hawl gabka Sida uu qabo xeerka hawl gabka;
3) Waa in uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ah ama darajada ciidan oo u dhiganta;
4) Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo aan ka yareyn 5 sano oo uu ka soo shaqeeyay Hay'adda;
5) Kaaliyaasha Agaasimaha Guud waxaa si gaar ah uga reebban waxa walba oo ka reebban Agaasimaha Guud ee ku cad Qodobka 13aad ee Sharcigaan; iyo
6) Waa in uusan ku dhicin xukun maxkamadeed oo ka reebaya in uu qabto xil dowladeed;

## QODOBKA 17AAD: SHURUUDAHA XUBINNIMADA HAY'ADDA

Qofkasta oo ka mid noqonaya ama ka sii mid ahaanaya Hay'adda waxaa laga rabaa in uu soo buuxiyo shuruudahan:

1) In uu yahay Soomaali Muslim ah;
2) Da'diisu u dhaxeyso 18 ilaa iyo sida Xeerka hawl gabku uu qabo;
3) Caafimaad ahaan ka soo bixi karo shaqada Hay'adda;
4) Aanan horay uga mid noqon ciidan ama sirdoon dal kale;
5) Ku tilmaaman xasillooni, garasho, iyo asluub wanaag;
6) Horay aan loogu xukumin fal dambiyeed ka dhan ah sharafta iyo ammaanada; iyo
7) In uu ka fog yahay fikirka ku saleysan xagjirnimada aaminsan rabshadaha, xiriirna la laheyn kooxaha argagixisada ah.

## QODOBKA 18AAD: QAADASHADA XUBIN CUSUB

1) Qaadashada xubnaha cusub ee ka mid noqonaya Hay'adda waxaa lagu saleynayaa karti, aqoon iyo asluub wanaag;
2) Looma qaadan karo xubinnimada Hay'adda qof aan baahi shaqo loo qabin, xuquuqdiisana lagu soo darin miisaaniyadda Hay'adda ama loo haynin qaab kale oo lagu dabooli karo xuquuqdiisa; iyo
3) Qofka u shaqeynaya Hay'adda qasab ma aha in uu noqdo xubin ka tirsan Hay'adda, waxa uu noqon karaa qof kula shaqeeya heshiis ama gacansiin kaliya.

## QODOBKA 19AAD: MUDDADA TIJAABADA IYO SHAQOJOOGTEYNTA

1) Qof kasta oo loo qaato in uu xubin ka noqdo Hay'adda, waxaa uu galayaa muddo saddex (3) bilood oo tijaabo ah, oo uu ku qaadanaayo tababar loogu carbinayo shaqada Hay'adda, isla markaana loo kuurgalayo heerka ku haboonaashaha qofka la magacaabay in uu ka sii mid ahaado Hay'adda, waxaana laga soo gudbinayaa warbixin joogta ah oo xaaladdiisa lagu qiimeynayo;
2) Marka ay dhammaato muddada tijaabada, Agaasimaha Guud, isaga oo wax ku dhisaya warbixinnada laga diyaariyay xubinta, waxaa u bannaan:
   (b) In uu go'aamiyo in xubinta laga dhigo xubin rasmi ah, kuna soo saaro wareegto rasmi ah meeleynteeda;
   (t) In uu soo saaro "amar fulin ka kaaftoomid ah" marka aan lagu qancin qiimeynta qofkaas;
3) Guud ahaan habraaca qaadashada xubin cusub iyo arrimaha la xariira waxaa nidaaminaya xeer-hoosaadyada Hay'adda.

## QODOBKA 20AAD: DHAARTA

1) Agaasimaha Guud/Taliye, waxaa lagu hor dhaarinayaa Madaxweynaha JFS hortiisa;
2) Kaaliyayaashiisa, iyo guud ahaan saraakiisha iyo xubnaha Hay'adda marka xil loo magacaabo waxay ku hor dhaaranayaa Agaasimaha Guud/ Taliyaha sida ku cad Faqradda 2aad ee qodobkan, sidoo kale waxaa dhaartan ku dhaaranaya cid kasta oo ka mid noqoneysa Hay'adda;
3) Dhaartuna waa sidan: **"**waxaan ku dhaaranayaa magaca ILAAHAY in aan daacad u noqdo Qaranka, Dastuurka, sharcigaan iyo shuruucda kale dalka, una hoggaansamo amarrada madaxda sare, dhawrana sirta Qaranka**"**.

## QODOBKA 21AAD: ANSHAXA IYO MABAAD XUBNAHA HAY'ADDA

Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda waxaa ku waajib ah:

1) In ay si hufan u gudato waajibaadka shaqo ee saaran si waafaqsan Sharcigaan, iyo dhammaan shuruucda kale ee dalka;
2) In uu si dhaga-fudeyd ku jiro ugu hoggaansamo amar kasta oo uga yimaada madaxda ka saraysa oo aanan ka hor imaaneyn Sharcigaan;
3) Dareensanaado in uu shaqo ku jiro goor walba iyo goob walba oo uu joogo iyo xaalad kasta oo uu ku sugan yahay;
4) Ilaaliyo sirta qaranka, uuna xafido amaana kasta oo qaranku leeyahay ama masuul ka yahay nooca ay ahaataba;
5) Dhowro sumcadda iyo magaca Hay'adda, kana ilaaliyo wax kasta oo sumcad-xumo u soo jiidi kara;
6) In uu naftiisa u huro ilaalinta danaha qaran ee umadda Soomaaliyeed iyo amnigeeda;
7) In uu si fiican u fahmo, kuna dhaqmo Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha, iyo xeer-hoosaadyada Hay'adda.

## QODOBKA 22AAD: KU MEELAYNTA HAY'ADDA QOF AAN KA TIRSANAYN

Agaasimaha Guud waxa uu awood u leeyahay in uu qof aan ka tirsanayn Hay'adda ku meeleeyo si ku meelgaar ah, marka uu ku qanco in meeleyntiisa ay ku jirto danta shaqada Hay'adda. Qofkaas inta uu ka shaqaynayo Hay'adda waxaa uu dulsaar ku ahaanayaa miisaaniyadda Hay'adda.

## QODOBKA 23AAD: MUSHAARKA, GUNNOOYINKA, DALACSIINTA & XAQSIINTA

Xeer-nidaamiyaha ayaa nidaaminaya mushaaraadka, gunnooyinka, dalacsiinta iyo guud ahaan xuquuqaha xubnaha Hay'adda.

## QODOBKA 24AAD: AWOODAHA XUBNAHA

Xubinta ka tirsan Hay'adda waxa ay awood u leedahay marka loo amro ama lagu waajibiyo arimahan:-

1) Adeegsiga awood kasta oo ku cad Qodobka 8aad ee Sharcigaan;
2) Wadashada iyo isticmaalka hubka;
3) Xuuraanka, dabagalka, joojinta, fatashaadda, wareeysiga, qabashada iyo eryashada ciddi uu u arko in ay khatar ku tahay amniga, ama faldanbiyeed faraha kula jirta si waafaqsan Sharcigaan;
4) Ururinta xogaha muhimka ah iyo keydintooda, sida: maqal, muuqaal, qoraal, iyo wixii caddeyn u noqon kara fal dambiyeed faraha lagula jiro ama soo fool leh;
5) Isticmaalka magacyo, muuqaaallo, baasaboorro iyo aqoonsiyo kala duwan xilliga uu gudanayo waajibaadkiisa shaqo marka uu helo oggolaasho uu bixiyey Agaasimaha Guud/Taliyaha;
6) Cid is hortaagi karta ma jirto xubin Hay'adda ka tirsan oo waajib- gudasho Sharcigaan waafaqsan ku jirta. Hadii ay dhacdo in is hortaag lagu sameeyo shaqada, xubinta Hay'adda ka tirsan waxaa u furan in falka lagula kacay ka reebato caddeyn maqal iyo muuqaal ah, si loola xisaabtamo ciddii ku kacday.

## QODOBKA 25AAD: XUQUUQDA ASAASIGA AH EE XUBNAHA

Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda waxa ay leedahay xuquuqda asaasiga ah ee hoos ku qoran iyo xuquuqdii kale ee Sharcigaan, xeer-nidaamiyaha, ama xeer-hoosaadyada Hay'addu siiyaan:

1) Mushaar bille ah oo ku jaango'an darajadiisa ciidan ama rayid;
2) Gunnooyin uu ku muteysanayo hadba nooca, ahmiyadda, iyo xilka uu Hay'adda u hayo;
3) Fasax bil ah sanad walba oo ay xubintu mushaarkeeda qaadanayso, ama baddal u dhigma;
4) Daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah marka uu u baahdo;
5) Fasaxyada maalmaha ciidaha ama feestooyinka qaran ama baddal u dhigma;
6) Saacado nasasho maalinle ah oo aan ka yareeyn 8 saacadood;
7) Dallacsiin marka uu muteysto sida xeer-nidaamiyaha Hay'addu tilmaamayo;
8) In uu helo xuquuq kasta oo uu ku muteysto Sharcigaan, xeer- nidaamiyaha, xeer-hoosaadyada iyo go'aamada maamul ee madaxda Hay'adda.

## QODOBKA 26AAD: MUDNAAN GAAR AH

Iyada oo la xeerinaayo dabeecadda shaqada Hay'adda, xubnaha Hay'adda, waxa ay yeelanayaan Mudnaan Gaar ah , haddii aysan fal- danbiyeed gacanta kula jirin, sida ku cad faqradaha qodobkan;

1) Lama xuuraami karo, lama dabagali karo, lama joojin karo, lama xiri karo, lama fatashi karo, lamana baari karo xubin ka tirsan Hay'adda ayada oo aan oggolaansho laga wadan Agaasimaha Guud ee Hay'adda ama qof uu wakiishay;
2) Lama baahin karo xogta khaaska ah ee xubin Hay'adda ka tirsan, sida: sawaradiisa, magaciisa, cinwaankiisa, shaqada uu Hay'adda u hayo, iyo wixi la mid ah;
3) Dacwo laguma soo oogi karo, lagumana maxkamadeyn karo xubin ka tirsan Hay'adda shaqo loo diray darteed, iyada oo aan oggolaansho laga helin Agaasimaha Guud ama

Madaxweynaha haddii cidda la maxkamdeeynayo ay tahay Agaasimaha Guud. Oggolaanshaha maxkamadeeynta xubnaha Hay'adda waa waajib in la bixiyo marka la hubsado in maxkamadeeynta la marinayo xubinta aysan wax u dhimeynin shaqada Hay'adda;

4) Dhammaan nuucyada kala duwan ee maxkamadeynta xubnaha Hay'adda waa in ay noqdaan qarsoodi si gaar ah loo qaado;
5) Agaasimaha Guud/**Taliyaha** inta uu haayo xilka waxa uu leeyahay xasaanad iyo habmaamuus la mid ah kan xubnaha Golaha Wasiirrada;
6) Marka xaqiijinta cadaaladda darteed loogu baahdo, cid aan Agaasimaha Guud aheyn ma amri karo xubnaha Hay'adda in ay bixiyaan xog sirdoon oo ay hayaan;
7) Qofna kuma cadaadin karo Hay'adda iyo xubnaheeda in uu ka helo xogo sirdoon oo ay hayaan isaga oo cuskanaya xaqqa helitaanka xogta ee uu tilmaamay Dastuurka;
8) Guud ahaan habmaamuuska xubnaha Hay'adda waxaa nidaaminaya xeer-hoosaad oo uu soo saarayo Agaasimaha Guud.

## QODOBKA 27AAD: CIIDANKA LABBISAN EE HAY'ADDA

1) Hay'addu waxa ay yeelaneysaa ciidamo gaar ah oo labbisan ama aan labbisneyn oo fuliya howlgallada amni ee Hay'adda shaqadeeda xiriirka la leh;
2) Guud ahaan, ciidammada labbisan ee Hay'adda waxa ay noqonayaan kuwo tiradoodu kooban tahay, kuna xirantahay hadba baahida amni ee jirta;
3) Waajibaadka ay leeyihiin ciidammada labisan ee Hay'addu waxa ay ku kooban yihiin oo kaliya:
   (b) Fulinta howlgalada gaarka ah ee Hay'adda;
   (t) Sugidda amniga xarumaha Hay'adda iyo fadhiyadeeda;
   (j) Sugidda amniga masuuliyiinta Hay'adda iyo kuwa kale ee loo garto;
   (x) Sugidda amniga martida qaranka;
   (kh) Sugidda amniga goobaha xasaasiga u ah dowladda iyo baraha qarsoon;
   (d) Kaalmeynta qeybaha kala duwan ee ciidanka qalabka sida iyo hay'adaha amniga marka loo baahdo, si aan wax u dhimeynin waajibaadkooda gaarka ah;
   (r) Waajibaadyada gaarka ah ee Agaasimaha Guud u xil saaro si waafaqsan qodobka 12-aad ee Sharcigaan;
4) Darajooyinka iyo dallacsiinta guud ahaan xubnahaHay'addaeeciidan ama rayid ah waxaa nidaaminaaya xeer-nidaamiyaha Hay'adda.

## QODOBKA 28AAD: SHAQA KA JOOJIN, KEYD GALIN, DARAJO DHIMIS IYO SHAQO KA SAARID

1) Shaqo ka joojin, waxaa loola jeedaa ka reebid laga reebo xubin ama qof Hay'adda u shaqeynayay gudashada waajibaadkii uu u xilsaarnaa, waxaana sameyn kara Agaasimaha Guud/Taliyaha, Kaaliye Agaasime Guud, Agaasime, iyo Masuul howl uu u madaxbannaan yahay u sarreeyo oo kaliya. Habraaca xubin ama qof Hay'adda u shaqeeyo shaqo ka joojin loogu sameynayo waxaa lagu faah-faahin doonaa xeer-hoosaadka Hay'adda;

2) Shaqo ka saarid, waxaa loola jeedaa in la baabi'iyo xubinnimada qof uu ku dhex lahaa Hay'adda iyada oo si dhameystiran looga saarayo diiwaanka guud ee Hay'adda. Shaqa ka saarid waxaa sameyn kara oo kaliya Agaasimaha Guud/Taliyaha isaga oo fulinaayo amar ama xukun maxkamadeed dhaqangal ah ama xeerinaayo xaalad uu Sharcigaan ama xeer-nidaamiye waajibiyay in qofka shaqada laga saaro;

3) Darajo Dhimis, waxaa loo la jeedaa in hoos loo dhigo ama la baabi'iyo darajo xubin rayid ah ama garaado xubin ciidan ah oo Hay'adda ka tirsan. Darajo dhimis waxa ay ku dhacdaa oo kaliya xukun maxkamadeed oo kama dambeys ah, waxa uuna dhaqangal ku noqonayaa xeer Madaxweyne.

## QODOBKA 29AAD: WAAYIDDA XUBINNIMADA

Xubinnimada Hay'adda waxaa lagu weynayaa xaaladaha soo socda mid kamid ah:

1) Buuxsamidda sanadka howlgabka si waa faqasan xeerka hawl gabka;
2) Aqbalaadda is casilaad xubintu soo gudbiso;
3) Qabashada xil dastuuri ah, ama shaqo kale oo dowladeed oo ka madax-bannaan shaqada Hay'adda meeleynna aan aheyn;
4) Waayista shardi ka mid ah shuruudaha xubinnimada sida ku cad Qodobka 18aad ee Sharcigaan;
5) U wareegista talis ciidan ama hay'ad dowladeed ee kale si dhammeystiran; iyo
6) Geeri ku timaadda xubinta.

## QODOBKA 30AAD: XAQA DACWADDA IYO EED-SHEEGASHADA XUBNAHA

Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda ama heshiis kula shaqeysay waxaa u bannaan in ay dacwo ama cabasho ka gudbiso cid kasta oo ku xadgudubta xuquuqdeeda, karaamadeeda, iyo amnigeeda; habraaca eed-sheegashada waxaa qeexayo xeer-nidaamiyaha Hay'adda.

## QODOBKA 31AAD: ARRIMAHA KA REEBBAN XUBNAHA HAY'ADDA

1) Dhammaan xubnaha Hay'adda, haddii aysan helin oggolaansho, waxaa ka reebban Sharcigaanna uu ka xadidayaa xuquuqaha iyo xorriyaadka la xiriiro:
   (b) Qaadashada dhalasho dal shisheeye isagoo gudanaayo waajibaadkiisa shaqo ee hay'adda;
   (t) Bixinta wareysiyo warbaahineed, faaqidaad iyo falanqeyn ku saabsan xaalado siyaasadeed, iyo faafinta qormooyin xambaarsan aragti siyaasadeed;
   (j) ururinta kaalmo- wadareed dhaqaale oo lagu taageerayo ujeeddo siyaasadeed.
2) Waxaa kale oo ka Reebban Guud ahaan Xubnaha Hay'adda:
   (b) Ka mid ahaanshaha urur, xisbi, iyo koox siyaasadeed ama diimeed gaar ah;
   (t) Fulinta amarro liddi ku ah qarannimada, Dastuurka, nabadgalyada, iyo shuruucda dalka.
   (j) Xubintu waxa ay xaq u leedahay in ay madaxdeeda ka codsato amar qoraal ah marka ay u aragto in ay lama huraan tahay in qoraal lagu caddeeyo;
   (x) Adeegsiga noocyada kala duwan ee maandooriyaha;
   (kh) Gabbaad-siinta tuhmane ama danbiile sharcigu ku raad joogo;
   (d) In uu ka qariyo khataraha amni ee uu xogaheeda helo cidda ay tahay shaqa ahaan in uu gaarsiiyo;
   (r) Ka qeyb-qaadashada mudaaharaadyada, cabasho wadareedka iyo sameynta shaqo-joojin cabasho ku saleysan;
   (s) Sameynta xiriirro aan idmaneyn oo uu la yeesho jiho shisheeye ah ama cadaw ah.

## QODOBKA 32AAD: MAXKAMADAYNTA XUBNAHA HAY'ADDA

Xubin ka tirsan Hay'adda ama la shaqeysa marka ay gasho fal-danbiyeed la xiriira shaqada Hay'adda waxaa lagu xukumayaa Xeerka Ciqaabta Ciidamada, waxaana lala tiigsanyaa

maxkamadda ciidamada gal- danbiyeedkiisa iyo dacwad qaadistiisuba waxa ay noqonayaan mid qarsoodi ah.

## QODOBKA 33AAD:ANSHAX-MARINTA XUBNAHA

1) Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda oo gasha fal liddi ku ah waxna u dhimaya anshaxa iyo dhaqanka ciidannimo waxaa loo cuskanayaa Xeerka Anshaxa Hay'adda;
2) Hay'addu waxey yeelaneysaa Xeerka Anshaxa iyo Guddiga Anshax- marinta.

## CUTUBKA 5AAD: CODSIGA BIXINTA WAARAN

## QODOBKA 34AAD: CODSIGA HAY'ADDA EE HELIDDA WAARAN

1) Marka ay Hay'addu u baahato waaran garsoor si ay u gudato waajibaadkeeda; codsiga ay Hay'addu sameyneyso waxaa soo saaraya Agaasimaha Guud/Taliyaha ama cidda uga masuulka ah howlaha barista;
2) Codsiga khuseeya Faqradda (1) waa mid haldhinacle ah, Hay'adda keliya ayaana geyn karta iyada oo aan loo baahnayn in dhanka kale la dhagaysto;
3) Waaranka ay Hay'addu ugu baahan tahay ka hortagga iyo ka dabatagga danbiyada shaqadeeda xiriirka la leh waxaa bixinaya oo ay waydiisaneysaa Maxkamadda ikhtisaaska u leh;
4) Hay'addu waxa ay waaran Maxkamadeed ugu baahan tahay:
    (b) Marka qof ay soo qabatay oggolaansho sii hayn iyo baaris tuhmane ugu baahato si baaris dhammeystiran loogu sameeyo;
    (t) Marka ay Hay'addu sameyneyso howlgal oo saameyn taban ku yeelan kara nafta, sharafta iyo hantida qofka, danaha qaranka, amniga gobolka iyo caalmka oo ay Hay'addu u baahan tahay oggolaansho fulin;
    (j) Marka qofka ay Hay'addu tallaabada ka qaadeyso asal ahaan aan waaranka u baahneyn uu yahay qof leh Xasaanad sharci ah.
5) Waaranka ay Hay'addu qaadato kuma qasbana in ay la wadaagto cidda ay tallaabada ka qaadeyso, gaar ahaan marka laga dheehan karo qoraalka waaranka xogo sir qaran ah;
6) Muddada uu dhaqangal ahaan karo waaran ay Hay'addu qaadatay kama badnaan karo 30 cisho, inta jeer ee Hay'adda waaranka loo cusbooneysiin karana waxaa go'aaminaya garsoorka ku shaqada leh, iyada oo la tixgalinaayo soojeedinta Hay'adda.
7) Markii, garsoorku ku qanci waayo codsiga waaranka ee Hay'adda, garsoorka waxaa u furan in uu soo saaro amar fasixid ah ama horgeyn maxkamadeed waqti cayiman leh.

## QODOBKA 35AAD: BIXINTA WAARAN

Jihada garsoor ee Hay'addu u gudbisatay codsiga waaranka, marka ay ku qanacdo sharcinimada waranka, hey'adda waxay xaq uleedahay in la siiyo waaranka.

## QODOBKA 36AAD: XAALAD DEG DEG AH

Haddii ay jirto xaalad gaar ah, oo falcelin degdeg ah u baahan, Agaasimaha Guud/Taliyaha ama cidda uu wakiishay waxa uu awood u leeyahay in uu qaado tallaabo waajib-gudasho ah iyada oo aan la helin waaran haddii la codsaday iyo haddii kaleba. Waase in Hay'addu warbixin maangal ah si deg deg ah ku soo gaarsiisaa ciddi ay aheyd in ay waaran ka qaadato muddo 24 saac gudahood ah, warbixintuna waa in ay noqotaa mid caddeyneysa waxa xaaladda deg deg ka dhigay oo waaranka loo sugi waayay, tallaabooyinka ay Hay'addu qaadday, waxa ka dhashay iyo cidda ay saameysay.

## QODOBKA 37AAD: XUQUUQDA DADKA HAY'ADDU HAYSO

1) Qof kasta oo ay qabato ama ay hayso Hay'addu oo la hayay muddo ka badan 48 saac waxa uu xaq u yeelanayaa:
2) In uu la xiriiro ehelkiisa iyo ciddii shaqo sharci ahi kala dhaxeeyso si aan wax dhib ah u geysaneyn baarista;
3) In uu la xiriiro garyaqaanadiisa, dhakhtarkiisa, iyo ciddii kale oo uu xiriir muhim ah uga baahdo si aan wax dhib ah u geysaneyn baarista.
4) Lama jirdili karo, lamana maskax iyo mooral dili karo qof kasta oo gacanta Hay'adda ku jira;
5) Waxaa u furan qofka Hay'adda gacanteeda ku jiro in uu helo cunto, cabitaan, dawo, dhar, buugaag uu akhristo iyo wixi kale ee la mid ah oo ka duwan inta maxaabiista loogu tala galay isagoo jeebkiisa isticmaalayo;
6) Dadka ku jira gacanta Hay'adda ee dumarka ah waxaa lagu haynayaa goob ilaalo hoosaad dumar ah leh, waxaana loola dhaqmayaa si waafaqsan shareecada islaamka iyo dhaqanka suuban;
7) Ehelada qofka ku jira gacanta Hay'adda waxaa u furan in ay soo booqdaan qofka xanniban xaaladiisana ay la socdaan waqtiyada loo cayimo;
8) Goobta lagu haynayo qofka ku jira gacanta Hay'adda waa in ay ahaato meel ku haboon in lagu haayo qof bani'aadan ah, lehna adeegyada lama huraanka u ah nolosha iyo fayadhowrka;
9) Wakiilka xeer-ilaalinta ee ku qoran xarumaha baarista ee Hay'adda waxa uu si joogta ah ula soconayaa xaaladaha dadka ku jiro gacanta Hay'adda si uu u hubsado in ay helaan xuquuqdooda oo dhammeystiran;
10) In sida ugu dhaqsiyaha badan loo sii daayo marka uu soo baxo xukun ama amar garsoor oo farya in xorriyadiisa dib loo siiyo, ama ay Hay'addu ka salgaarto kiiskiisa inta aan garsoor loo gudbin;
11) Habka loola dhaqmayo dadka ku eedeysan ama lagu tuhmayo kiisaska xiriirka la leh argagixisda iyo baasaasidda, waxaa nidaamin doono Sharciga La dagaalanka Argagixisada, iyo sharcigi kale ee arrimahaas khuseeya.

## QODOBKA 38AAD: BAARISTA IYO HUBINTA

1) Guud ahaan habraaca baarista iyo hubinta ay Hay'addu sameyso waxaa faahfaahinaya xeer-hoosaadka Hay'adda;
2) Caddeymaha danabeysan ama daabacan sida muuqaallada, sawirrada, codadka, qoraallada, tixraacyada xiriirka la leh tiknoolajiyada iyo wixi la mid ah, marka ay Hay'ddu tahay cidda hubin dhammeystiran ku sameysay isla markaana xaqiijisay in ay khuseeyaan kiiska ay gacanta ku hayso; caddeymaha noocaas ah garsoorku waa in uu u tixgaliyaa in ay yihiin caddeymo go'aan garsoor lagu qaadan karo oo dhaqangal ah.

## QODOBKA 39AAD: JIRDIL IYO XADGUDUB

Waxaa ka mamnuuc ah xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda ama u shaqeysa in ay qof kula kacdo jirdil, ficil naxariis darro ah ama bani'aadanimada ka baxsan.

## QODOBKA 40AAD: SHEEGASHADA XUBINNIMADA HAY'ADDA IYO MATALAAD BEEN ABUUR AH

Waxaa reeban, iyada oon oggolaansho qoraal ah laga haysan Agaasimaha Guud/Taliyaha, ama aan shaqo ahaan loogu idmaneyn; in la isticmaalaan magac, tilmaan, cinwaan ama calaamad laga yaabo in ay qofka kale ku hoggaamiso in uu rumaysto in shaqada loo qabanayo si Sharcigaan waafaqsan ama uu Hay'adda ka socdo.

## QODOBKA 41AAD: IS HORTAAGGA SHAQADA HAY'ADDA

Waxaa reeban, is-hortaag ku sameynta ama carqaladeynta shaqo sharci ah oo Hay'adda loo hayo oo ay ogtahay cidda falkaas ku kacaysa ama lagu wargaliyay.

## QODOBKA 42AAD: SHAACINTA XOG AAN LA FASAXIN

1) Qof kasta oo xubin ka ah Hay'adda, waxaa ka reeban in uu shaaca ka qaado xog uu ku helay u shaqaynta Hay'adda, asaga oo aan oggolaasho ka haysan Agaasimaha Guud/Taliyaha
2) Faqrada kowaad (1) ee qodobkan, waxa kale oo ay khuseysaa marka xubinta ama masuulku shaqada ka tago ama meeleyntii Hay'adda ka dhamaato, ama uu dhamaado heshiiskii shaqo ee Hay'adda kala dhexeeyay;
3) Qof walba (aan ka tirsaneyn Hay'adda) waxaa ka reeban faafinta xog u gaar ah Hay'adda, xubin Hay'adda ka tirsan ama cid ay shaqo kala dhaxeyso Hay'adda.

## QODOBKA 43AAD: BAABI'INTA XIRIIRRO IYO XOGO SIRDOON

1) Qof walba oo u shaqeeya Hay'adda oo haya xiriir sirdoon oo lagu ogyahay, kalana dhaxeeyo xubin, ila-wareed, adeege, ama jiha kale oo ay Hay'addu la leedahay xiriir ama iskaashi sirdoon, waxaa ka reebban in uu maareynta xiriirkaas u adeegsado aalad warqabad, isgaarsiin ama xog keydin aysan Hay'addu laheyn;
2) Xubin walba ama qof walba waxaa ka reeban in uu baabi'iyo ama uu wax ka badelo xog sirdoon oo uu hayey, ama lagu keydiyay qalab, aalad ama cinwaan uu ku shaqeynayay ama u gacan galay oo ay Hay'ddu leedahay ama uu kharribaad ama dayacaad u geysto qalabkii ama cinwaankii uu ku shaqeynayay ama u gacan galay ama uu diido in uu si buuxda u soo wareejiyo markii la faray ama xilkiisi uu dhammaaday.
3) Dhammaanqalabkaiyoaaladahalooadeegsadomaareyntaxogaha iyo xiriirada sirdoonka waxa ay yeelanayaan diiwaan gaar ah, habraaca lagu maareynayana waxaa tilmaamayo xeer-hoosaad;
4) Agaasimaha Guud/Taliyaha ee Xilka ka dagayo waxaa waajib gaar ah ka saaran yahay, marka uu xilka wareejinayo, in si gaar ah Agaasimaha Guud/Taliyaha ee cusub ugu wareejiyo diiwaanka guud ee adeegayaasha iyo Ila- wareedyada Hay'adda oo dhammeystiran

## CUTUBKA 6AAD: MAALIYADDA HAY'ADDA

## QODOBKA 44AAD: MIISAANIYADDA HAY'ADDA

1) Hay'adda waxa ay yeelaneysaa miisaaniyad sanadeed ku jaan go'an qorshe sanadeedkeeda, waxaana soo diyaarinaya Agaasimaha Guud/Taliyaha, ayada oo lagu fariisinayo halbeeg cilmiyeed sax ah, waxaana lagu darayaa miisaaniyadda guud ee Qaranka.
2) Madaxyada miisaaniyadda Hay'adda la iskuma dhex furi karo, waxaana loo fulinayaa sida loo qorsheeyay hadeysan soo kordhin baahi maangal ah oo qoraal lagu caddeynayo;

3) Guud ahaan miisaaniyadda iyo maaliydda Hay'adda waxaa nidaaminaya xeer-hoosaad uu soo saarayo Agaasimaha Hay'adda, si waafaqsan xeerka maaliyadda guud ee dalka;
4) Qoondada miisaaniyadda barnaamijyada qaran ee ku mataaneysan Hay'adda waxaa si toos ah loogu shubayaa xisaabaha gaarka ah ee barnaamijyadaas, waxaana si toos ah u maamulayo hadba agaasimaha masuulka ka ah.

## QODOBKA 45AAD: XISAABAADKA IYO HANTIDHOWRKA

Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka ayaa u xilsaaran in uu faafreeb iyo dabagal ku sameeyo miisaaniyadda Hay'adda iyo sida loo isticmaalay, waxaase sir u ahaanayo Hay'adda oo aanan dabagal iyo tixraac midna lagu samayn karin madaxa-miisaaniyadeedka laga maareeyo howlaha sirdoonka, waxa uuna noqonayaa xisaab furan oo uu si toos ah u maamulo Agaasimaha Guud ama ciddi uu u xil saaro ee sirdoonka ku shaqo leh.

## QODOBKA 46AAD: DHAQAALAHA HAY'ADDA

Hay'addu waxa ay yeelan kartaa mashaariic maalgalineed ganacsi ah, iyo in ay bixiso adeegyo kala duwan oo ay ka heleyso dakhli dheeri ah oo ay u kaashato howlaheeda si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda (PFM)

## CUTUBKA 7AAD: QODOBBO QUBANE AH

## QODOBKA 47AAD: KAALINTA WASAARADDA AMNIGA GUDAHA EE KU AADAN HAY'ADDA

1) Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka, waxa ay Hay`adda ku yeelanaysaa kaalinta hoos ku xusan:
2) Waxa ay Hay`adda ku matalaysaa fagaaraha siyaasadda guud ahaan iyo Golaha wasiirada gaar ahaan;
3) korjoogteyn howlaha Hay`adda iyo hubinta in ay waafaqsan yihiin siyaasadda amniga Qaranka iyo qorshaha guud ee Xukuumadda;
4) Qorshaha sanadlaha ah ee Hay`adda, waxa uu qayb ka yahay qorshaha guud ee Wasaaradda, waxaana lagu meel marinayaa Golaha wasiirada;
5) Xiriirada maamul ee Hay`addu la yeelanayso Wasaaradaha kala duwan ee dowladda, waxa ay marayaan Wasaaradda oo ku lifaaqaysa qoraal gudbin ah, si waafaqsan xiriirada maamul ee rasmiga ah;

## QODOBKA 48AAD: WAAJIBNIMADA LA SHAQAYNTA HAY'ADDA

Dhamaan muwaadiniinta iyo ajaanibta ku sugan dalka gudahiisa, ama ka tirsan laamaha iyo heerarka kala duwan ee dowladda, waxaa waajib ku ah in ay Hay'adda ku gacansiiyaan shaqada qaran ee ay hayso, ilaaliyaanna sirnimada shaqada ay Hay'adda la hayaan, kuna howlgalaan hadba tilmaamaha ay Hay'addu bixiso ee la xiriira wada shaqeynta iyo gacansiinta Hay'adda, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

## QODOBKA 49AAD: MAMNUUCIDDA XABSIYO QARSOODI AH

Hay'addu ma yeelan karto xabsiyo qarsoodi ah, laakiin waxaa u furan in ay yeelato xarumo baaris oo la yaqaan, oo ay ku hayso dadka la soo qabto inta ay baaristu ku socoto oo keli ah.

## QODOBKA 50AAD: BAABI'IN

Waxaa la baabi'yey Xeer lr.14 ee Febraayo 1970 iyo Sharci kasto ee ka hor imaanayo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC HOUSE OF THE PEOPLE GOLAHA SHACABKA

## QODOBKA 51AAD: DHAQAN-GALKA SHARCIGAAN

Sharcigaan waxa uu dhaqan galayaa, marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya